

## JIDADKA BASASKA WELI LAMA GO


WARBIXINTA MASHRUUCA | MEEY 2023

## DARAASADDA HAWSHA JIDKA WEJIGA II

Mashruuca Baska Degdegga ah ee METRO Purple Line wuxuu eegayaa hab kale oo ah jidadka Maryland iyo White Bear si loogu aadi karo Suuqweynaha Maplewood intii loo mari lahaa Marinka Jidka Deegaanka Bruce Vento. Mashruucu waxa uu is barbar dhigi doonaa labadan jid si loo go'aamiyo kan ugu fiican ee dadka deegaanka iyo meheradaha.

## FAAHFAAHINTA JIDMARISTA

- Jidadka Maryland iyo White Bear Degmada Ramsey ayaa iska leh oo dayactirata.
- Purple Line waa bas degdeg ah oo adeegsan doona hal haad oo ah dhinac kasta.
- Mashruucu wuxuu qiimeyn doonaa goobaha ah baarkinka, jidadka baabuurta, isgoosyada lugeynta, jidadka lugeynta, wadiiqooyinka, iyo basaska kale ee loo qaato labada joho.



## WAA MAXAY BASASKA DEGDEGGA AH?

Waa hawl lagu hagaajinayo gaadiidka dadweynaha, si ay dadku ugu xirnaadaan, iyo si ay basasku u noqdaan kuwa ka dhakhso badan kuwa kale. Kuwaas waxaa ka mid ah:

- Bas wakhtiyoo badan, oo maalinta oo dhan u socda labada joho, toddobada maalmoodba
- Joogsiyo yar, jidad ay mari karaan basaska oo keliya, iyo in ay nalalka samaafaraha ah si degdeg ah ugu furmaan baska.
- Lacagta oo la sii bixiyo intaan la soo raacin baska si aan loogu daahin iyo boosteejada oo xakabad loo dhiso si basaska loogu fuulo.
- Boosteejooyinka oo la weyneeyo, calaamado sheegaya wakhiyada basaska, kuleylifi, iftiin badan, iyo goobaha sugidda baska oo la hagaajiyo.
- Basaska oo loo waasiciyo gudaha, albaabbo badan, iyo nafaas si ay u dhex maraan kursiga curyaanka iyo kursiga ilmaha lagu riixo.

## UJEEDKA IYO BAAHIDA

### In loo diyaargarooobo baahida dadka ku tiirsan gaadiidka dadweynaha

In la caawiyo dadka aan baabuurta isticmaali karin, dadka aan awoodi karin, iyo dadka aan rabin.

### In la badiyo gaadiidka dadweynaha si ay dadku ugu xisaabtamaan.

Raacitaanka baska degdegga ah ee hadda aad ayuu u fiicnaa intii lagu jiray faafitaanka COVID-19 oo dadkii raacayey ayaa aad uga badnaa basaska kale, sidaas ayey noogu muuqataa baahida loo qabo bas degdeg ah maalintii oo dhan

### Qorsheyn ah xoojin iyo horumarin joogto ah

in xal loo helo cirrika baabuutu keento iyadoo la ballarinayo gaadiidka dadweynaha iyo tasiilaadka dadka, iyo meelaha lagu lugeeyo.

### In la kordhiyo fursadaha lagu raaci karo basas aadaya meel kasta

In dadka la tuso in ay gaadiidka dadweynuhu ka qiima jaban yihiin baabuurta la wato si wax looga qabto tayada hawada iyo qiiqa hawada wasakheynaya.

## SIDEE LOO GO 'AAMIYAA GOOBAHA NOQONAYA BOOSTEEJOOYINKA?

- Guryaha, shaqooyinka, iyo danaha kale ee jid kasta ayaa la tixgeliya
- Fikrado ayaa laga codsadaa dadweynaha
- in la eego inta u dhhexeysa boosteejooyinka MAGAALADA
- In la tixgeliyo boosteejooyinka basaska ee jidka hadda
- Qorsheyn ah isticmaalidda dhulka
- In la tixgeliyo basas aan istaageyn iyo hawlaho farsamada

## TALLAABOOYINKA XIGA

- In la qiimeeyo bas ah Purple Line oo maraya Maryland iyo White Bear oo lagu gaari karo Xarunta Gaadiidka Dadweynaha Suuqweynaha Maplewood
- In la qiimeeyo baska Purple Line haddii lagu aadayo Vadnais Heights ama Century College
- In la tixgeliyo baddil kale oo ah Bruce Vento Trail in lagu daro talooyinka ugu dambeeya.
- Hawlgelinta dadweynaha ee goobaha boosteejada, jidadka basku mari doono, iyo in ay sii socoto tallaabo kasta oo ah fikradda naqshadeynta.

Booqo [metrotransit.org/purple-line](http://metrotransit.org/purple-line) oo ogow siyaabaha aad uga qeygeli karto mashruuca iyo sida aad ula socon karo wixii akhbaar ah.

Haddii aad rabto in ay shaqaalaha baska Purple Line u yimaadaan guryaha xaafaddaada, ururka xaafadda, meheradaha, ama in ay kulan idinla yeeshaan, fadlan la soo xiriir.

## NALA SOCO



**Boostada intarnetka ku rukumo wixii akhbaar ah:**  
[metrotransit.org/purple-line](http://metrotransit.org/purple-line)



**Fariiin noogu soo dir:**  
[purpleline@metrotransit.org](mailto:purpleline@metrotransit.org)



**Nagala soo xiriir**  
651-602-1955



**Nagala soco:**  
@PurpleLineBRT

### If you need this information in an alternative format or language, contact:

Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:

Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:

Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xiriir:

နမ်းသံအိုးနှင့်တရာ့တရာ့အံလတ်ခံမဲ့အကျိုလတ်ကယ့်ထာတ်အံအော်မူးကို။၊ ဆုံးကျွဲ့

### Colin Owens

Iskuduwa Xiriirka Dadweynaha

651-602-1987

[colin.owens@metrotransit.org](mailto:colin.owens@metrotransit.org)